

## FARRIIN MUHIIM AH

Janaayo 2024

Ku Socoto: Dhammaan Ka-qaybgalayaasha Sanduuqa Maalgelinta Caafimaadka

Ka Socoto: Wilson-McShane Corporation

Ujeedo: Adeegga Dakhliga Gudaha (“IRS”) – Foomka 1095-B

---

Dhammaan Ka-qaybgalayaasha Sanduuqa Maalgelinta Caafimaadka,

Laga soo bilaabo 2015, sanduuqaaga maalgelinta caafimaadka ayaa kuu diyaarinayay Foomka IRS 1095-B. Foomkan waxa uu soo koobayaa bilaha daboolista caymiska caafimaadka ee adiga iyo kuwa kugu tiirsan ee xaqa u leh lagu daboolay sanduuqa maalgelinta caafimaadka ee sannadkii hore. Waxaad horey ugu baahatay foomkan ujeedooyin la xiriiira canshuur-celinta dakhliga shakhsi ahaaneed.

Laga soo bilaabo sanad canshuureedki 2019 iyo wixii ka dambeeyay, sharciga federaalku wuxuu hoos u dhigay bixinta mas'uuliyadda la wadaago (ganaaxa canshuurta) ilaa \$0 haddii ay jireen bilo aad ku guuldareysatay in aad joogteyso daboolista caymiska caafimaadka. **Si kale haddii loo dhigo, uma baahnid Foomka 1095-B si aad u buuxiso oo aad u xarayso canshuur celintaada dakhliga ee shakhsi ahaaneed ee 2023 oo si toos ah Foomka 1095-B ugama heli doontid Sanduuqa.**

Sanduuqa caafimaadka ayaa weli looga baahan yahay in uu u oggolaado ka qaybgalayaasha awoodda ay ku codsan karaan Foomka 1095-B iyadoo la adeegsanayo hababka soo socda:

1. Ku Codsiga Taleefanka - Garaac 1-800-535-6373 (Fadlan u diyaargarow in aad xaqiijiso magaca sanduuqaaga maalgelinta/ ururkaaga, magacaaga, cinwaankaaga boostada, taariikhda dhalashada iyo 4-ta lambar ee ugu dambeeya Lambarkaaga Sooshal Sakuuratiga);
2. Ku Codsiga Iimaylka - Codsii u gudbi [1095request@wilson-mcshane.com](mailto:1095request@wilson-mcshane.com) (Fadlan xaqiiji in aad ku dartid magaca sanduuqaaga maalgelinta/magaca ururkaaga, magacaaga, cinwaankaaga boostada, taariikhda dhalashada, lambarka taleefanka iyo 4-ta lambar ee u dambeeya Lambarkaaga Sooshal Sakuuratiga oo aad ku darto iimaylka); ama,
3. Ku Codsiga Boostada - Gudbi codsi qoraal ah oo ay ku jiraan magaca sanduuqaaga maalgelinta/magaca ururkaaga, magacaaga, cinwaankaaga boostada, taariikhda dhalashada, lambarka taleefanka iyo 4-ta lambar ee u dambeeya Lambarkaaga Sooshal Sakuuratiga oo aad ku darto codsiga una dirto:

Wilson-McShane Corporation  
Attn: Waaxda U-qalmitaanka  
3001 Metro Drive, Suite 500  
Bloomington, MN 55425

**Mar kale, uma baahnid Foomka 1095-B si aad u buuxiso oo aad u xarayso canshuur celintaada dakhliga shakhsi ahaaneed ee 2023.**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan arrintan, fadlan Wilson-McShane Corporation ka wac 952-854-0795 ama wac lambarka wicitaanka bilaashka 800-535-6373.